



MACLUUMAAD MUHIIM AH OO LOOGU TALAGALAY QAXOOTIGA DHAWAAN SOO GAARAY

WAA MAXAY DIB-U-EEGISTA QAXOOTIGA?



21-kii Nofeembar, 2025, dowladda Mareykanka waxay ku dhawaaqday inay dib u eegi doonto kiisaska dhammaan qaxootiga soo galay Mareykanka intii u dhexeysay 21-kii Janaayo, 2021 iyo 20-kii Febraayo, 2025. Tani waxay ku jirtaa qaxootiga hadda haysta kaararka cagaaran, iyo kuwa codsaday kaararka cagaaran ee weli sugaya go'aan.

Laga bilaabo 13-kii Janaayo, 2026, IRAP waxay maqashay warbixino sheegaya in saraakiisha socdaalka (ICE) ay guri guri u marayaan bulshooyin gaar ah oo ay bartilmaameedsanayaan guryaha qaxootiga. **Haddii ICE ay gurigaaga timaado, ha furin albaabka.** Si ay gurigaaga u galaan, **saraakiishu waa inay ku tusaan amar maxkamadeed oo uu saxiixay garsoore gobol ama federaal ah** (ma aha Garsoore Socdaal).

SIDEEN KU OGAAN KARAA INAY TAHAY ICE?



ICE waxay isku dayi karaan inay ku soo saaraan bannaanka gurigaaga ama ay sameeyaan sabab been ah ("khiyaano") si ay u galaan. Waxay iska dhigi karaan inay jirto xaalad degdeg ah ama baaritaan. Waa muhiim inaad albaabkaaga xirnaato oo aad ka codsato dadka aanad garanayn inay is aqoonsadaan. Qof kasta oo sheegta inuu ka tirsan yahay hay'adaha fulinta sharciga waa in laga codsadaa inuu soo bandhigo amar maxkamadeed.


Khiyaanooyinka caadiga ah:

- Baaritaan guud/ciqaabeed
- Xatooyo aqoonsi
- Shil gaari

WAA MAXAY WAXA AAD KA OGAATO XIRITAANKA GUDAHA MAREYKANKA



Haddii ICE ay ku xirto adiga iyo xubno kale oo qoyskaaga ka tirsan, waxay ku kala fogeyn karaan oo ku diri karaan xarumo kala duwan oo xiritaan.



Hantidaada waa la qaadi doonaa. Xasuuso lambarrada telefoonka ee muhiimka ah oo nuqullo ka samee dukumentiyadaada kuna dir qof aad ku kalsoon tahay.



Si aad u hesho xubnaha qoyskaaga ama saaxiibkaaga ay ICE xiray, iska sawir koodhkan. Waxaad ka raadin kartaa A# iyo dalka dhalashada, ama macluumaadka nolasha shakhsiga. Waa inaad hubisaa maalin kasta.

Codso liiska qareenno bilaash ah oo la xiriir. Ku adkee inaad rabto inaad la hadasho qareen oo codso inaad hesho lambarka telefoonka.



LAGA SOO BILAABO XARUMAHA XIRITAANKA, WAXAAD GARAAACI KARTAA 9233# SI AAD U GAARTO ADEEGYADA SHARCIGA AMA AAD U SOO SHEEGTO XADGUDEB.



WAA MAXAY WAXA AAD KA OGAATO WAREYSIGA DIB-U-EEGISTA

Waxaa lagu waydiin karaa ama lagu wareysan karaa codsigaaga qaxootinimo, xitaa haddii aad horey u haysatay kaarka cagaaran ama aad codsatay. **Haddii aadan si fiican u hadlin Ingiriis, waxaad xaq u leedahay wareysi luqaddaada ah.**

Inta lagu jiro wareysiga dib-u-eegista, waxaa lagu weydiin karaa su'aalo badan oo ku saabsan sababta aad uga tagtay dalkaaga ama sababta aad uga baqayso inaad dib ugu laabato. Su'aalahan waxay aad ugu egyihiin su'aalihii lagaa weyddiyay markii lagu wareystay dibadda. Waa inaad si taxaddar leh oo daacad ah uga jawaabtaa, sida aad uga jawaabtay wareysigii asalka ahaa.

Si aad u akhrido maqaalka buuxa ee IRAP ee ku saabsan dib-u-eegista qaxootiga, iska sawir koodhkan QR ama booqo xiriirka hoose. Maqaalkan wuxuu diyaar ku yahay Afka Amxaariga, Carabiga, Dari, Faransiiska, Haitian Kreyol, Pashto, Boortaqiiska, Ruushka, Soomaaliga, Isbaanishka, Suwaahili, Tigrinya, iyo Yukreeniyaan.



<https://bit.ly/flier-so>

Si aad u hesho ilo sharci oo dheeri ah oo loogu talagalay qaxootiga iyo dadka magangalyo doonka ah, iska sawir koodhkan QR ama booqo xiriirka hoose.



<https://bit.ly/IRAP-ES>

Xasusnow! Xaaladda qof walba way ka duwan tahay, warqaddan macluumaadkuna ma bixiso talo sharci.